## ART-1
## HORDHAC

Xisbiga Tiir waxaa lagubilaabay markiihore magaca "Somali Peace & Progress (SPP)" taariikhdu markeey aheeyd bishii July 22, 2006, kadibna waxaa loobadalay magaciisa "TIIR PARTY" bishii June 21, 2011. Xisbiga Tiir waxaalagu aas aasay wadanka Maraykanka waxaana bilaabay dhalinyaro, waxaana hogaamiya dhalinyaro.

## ART-2
## MAGACA

Magaca Xisbigu waa TIIR

## ART-3
## XARUNTA

Xisbiga waxaalaga xukumaa magaalomadaxda Soomaalia

## ART-4
## UJEEDADA

Xisbiga Tiir waxaa loo aas aasay in uu gaarsiiyo Soomaaliya nabadgaliyo, kaladanbayn, qaranimo, iyo hormar. Xisbiga Tiir waxaa loogu talagalay in uu kadhaqan galiyo Soomaaliya fikirka 'xisbi-xisbi' kanashaqeeyo ciribtirka 'Qabyaaladda" ragaadisay dadkeena iyo dalkeena.

## ART-5
## SHARUUDAHA XUBNAHA CUSUB

Siloogu ogolaado xubnaha cusub in ay kamid noqdaa Xisbiga, waxaa lagarabaa inlagahelo shuruudahaan soosocda:

1) Waa in aad aaminsantahay 4.5 in uusan xal ukeenaynin Somaliya.
2) Waa in aad iskukalsoontahay, diyaarna utahay in aad waxkabadasho Soomaaliya
3) Waa in aad rabtid midnimada Soomaaliya, dibna aadan ooga qeebqaadanin qabyaaladda.
4) Waa in aad oogu deeqdid Xisbiga waqtigaada, dhaqaalahaada, fikirkaada, siloobadalo xaaladda Soomaaliya, diyaarna aad utahay hormarinta siyaasadda Xisbiga
5) Waa in aad xubin ka ahaato Xisbiga Tiir oo kaliye daacadna aad u ahaatid.
6) Waa in aad diyaar utahay ilaalinta qaanuunada Xisbiga, qofna aadan ooga aargoosnin waxlaxiriira danahaada khaaska ha.

## ART-6
## QAABDHISMEEDKA

Waaxaha Xisbigu waxay u nidaamsan yahiin sida soo socota:

1) Golaha Sare
2) Masuuliyiinta Gobalada
3) Golaha talabixiyaasha
4) Golaha ilaalinta xisbiga
5) Kormeera yaasha hay'addaha

## ART-7
## GOLAHA SARE

JAGOOYINKOODA, WAAJIBAADKOODA, MUDDADA XILKA AY HAYNKARAAN, IYO QAABKA LAGUSOO DOORAN.

Golaha Sare ee Xisbigu waxay udisanyihiin jagooyinkoodu sidaan soosocota:

1) Gudoomiye
2) Gudoomiye kuxigeenka waaxda siyaasadda
3) Gudoomiye kuxigeenka waaxda dhaqaalaha
4) Gudoomiye kuxigeenka waaxda hormarinta bulshada
5) Gudoomiye kuxigeenka waaxda diinta iyo dhaqanka
6) Xoghaye

GUDOOMIYAHA WAAJIBAADKIISA, MUDDADA XILKA UU HAYNKARO, QAABKA LAGUSOO MAGACAABO.

1) Waxaa soomagacaaba Golaha Ilaalinta xisbiga in uu hogaamiyo Xisbiga muddo shan (5) sano ah, kadibna waxuu xaq uleeyahay in dib loomagacaabo muddo sadex (3) sano ah oo kaliya.
2) Waxuu leeyahay awooda sare ee Xisbiga, waxuuna masuul kayahay in uu maamulo dhamaan geedisocodka siyaasadda Xisbiga.
3) Waxaa waajib ku ah in uu kunoolaado goobta lagaxukumo Xisbiga intuuhayo xilka Gudoomiyanimada.
4) Waxuu xaq uleeyahay in uu buuxiyo xilalka kabanaan Xisbiga asagoo kaheeysta ogolaansho xubnaha Golaha Sare ee Xisbiga.
5) Waxaa waajib ku ah in uu joogo dhamaan shirarka Golaha Sare iyo kuwa Xisbiga, unasheego xubnaha Xisbiga geedisocodka siyaadadda Xisbiga.
6) Waa afhayaynka Xisbiga, waxuuna xaq u leeyahay in uu arko arkeefka Xisbiga, iyo in uu saxiixo dhamaan macluumaadka muhiimka ah ee Xisbigu leeyahay.
7) Waxuu awood uleeyahay in uu casilo xubnaha Golaha Sare markii loobaahdo, asagoo kaheeysta ogolaansho Golaha Ilaalinta Xisbiga.
8) Waxuu awood uleeyahay in uu casilo xubnaha Masuuliyiinta Gobalada markii loobaahdo, asagoo kaheeysta ogolaansho Golaha Sare.

9) Xaq oomaleh in uu ku isticmaarsado xubnaha Xisbiga awoodiisa waxlaxiriira danahiisa khaaska ah.

GUDOOMIYE KUXIGEENADA, WAAJIBAADKOODA, MUDDADA XILKA AYHAYNKARAAN, QAABKA LAGUSOO MAGACAABO.

1) Waxaa soomagacaaba Gudoomiyaha xisbiga, waxaana asixiya Golaha Ilaalinta Xisbiga, in ay ushaqeeyaan Xisbiga muddo sadex (3) sano ah, kadibna waxay xaq uleeyihiin mararbadan in Golaha Ilaalinta Xisbiga ay dib usoomagacaabaan.
2) Midkastoo kamid ah Gudoomiye Kuxigaynada waxuu masuul kayahay Hay'addiisa, hormarkeeda, khasaaraheeda, iyo waxa ay qabato.
3) Waxaa waajib ku ah midkastoo kamid ah Gudoomiye Kuxigeenada in uu kunoolaado goobta lagaxukumo Xisbiga intuuhayo xilka.
4) Waxuu awoood uleeyahay in uu usheego xubnaha Hay'addiisa in ay raacaan qaanuunka u yaala Xisbiga.
5) Waxaa waajib ku ah in uu soodiyaariyo kharashka kubixikara Hay'addiisa sanadka oodhan, kadibna uu ubandhigo Golaha Sare kanasugo ogolaansho.
6) Waxaa waajib ku ah in ay ulashaqeeyaan Gudoomiyaha Xisbiga sidaacadnimo ah.
7) Majiro midkamid ah Gudoomiye Kuxigeenada oo xaq uleh in uu ku isticmaarsado xubnaha Hay'addiisa awoodiisa waxlaxiriira danahiisa khaaska ah.

XOGHAYAHA, WAAJIBAADKIISA, MUDDADA XILKA UU HAYNKARO, QAABKA LAGUSOO MAGACAABO.

1) Waxaa soomagacaaba Gudoomiyaha xisbiga, waxaana asixin Golaha Ilaalinta Xisbiga, in uu ushaqeeyo Xisbiga muddo sadex (3) sano ah, kadibna waxuu xaq uleeyahay mararbadan in ay dib usoomagacaabaan Golaha Ilaalinta Xisbigana.
2) Waxaa waajib ku ah in uu kunoolaado goobta lagaxukumo Xisbiga intuuhayo xilka Xoghayaha.
3) Waxaa waajib ku ah in uu meel aamin ah kuxareeyo dhamaan waraaqaha muhiimka ah ee Xisbiga, kulana shaqeeyo Gudoomiyaha Xisbiga sidaacadnimo.
4) Waxaa waajib ku ah in uu soodiyaariyo ajandaha shirarka Golaha Sare iyo kaguud ee sanadlaha Xisbiga, kadibna uu ogeesiiyo dhamaan xubnaha Xisbiga macluumaadka shirka oo qeexan.
5) Waxuu masuul kayahay dhamaan dhakumantiyada Xisbiga, waxaana mabnuuc ka ah in uu lawadaagu cidkale oon ogolaansho kaheesanin sharciga.
6) Waxuu xaq uleeyahay in uu qaato dhamaan awoodahii Gudoomiyaha Xisbiga markuu maqanyahay.
7) Hadduu Gudoomiyahu iscasilo, lacasilo, jirado ama uu dhinto, waxuu sikumeelgara ah oolawareegi dhamaan awoodahii Gudoomiyaha Xisbiga ilaa iyo inta ay Golaha Ilaalinta Xisbigu kasoomagacaabi Gudoomiye kale.
8) Xaq oomaleh in uu ku isticmaarsado xubnaha Xisbiga awoodiisa waxlaxiriira danahiisa khaaska ah.

**ART-8**

**MASUULIYIINTA GOBALADA**

WAAJIBAADKOODA, SIDA LAGUMAGACAABO, MUDDADA XILKA AY HAYNKARAAN

1) Waxaa soomagacaabi Gudoomiyaha xisbiga, waxaana asixin xubnaha Golaha Sare, in ay ushaqeeyaan Xisbiga muddo shan (5) sano ah, kadibna waxay xaq uleeyihiin mararbadan in Gudoomiyahu dib usoomagacaabo Golaha Sarena asixiyaan.
2) Waxaa waajib ku ah in ay maamulaan hoowlaha Xisbiga ee kasocda Gobelkooda, waxayna masuul kayihiin dhamaan hormarka, dibdhaca, iyo mashruucyada kasocda Gobelkooda.
3) Waxaa waajib ku ah in uu kunoolaado Gobalka uu matalo intuuhayo xilka.
4) Waxaa waajib ku ah in uu soodiyaariyo mashruucyada Gobelkiisa iyo kharashka kubixikara sanadka oodhan, kadibna uu ubandhigo qorshahiisa Golaha Sare kanasugo ogolaansho.
5) Miskastoo kamid ah Masuuliyiinta Gobalada waxuu awood uleeyahay in uu casilo kormeeraha Hay'adda Gobalkiisa markii loobaahdo, asagoo kaheeysta ogolaansho Golaha Sare.
6) Majiro midkamid ah Masuuliyiinta Gobalada oo xaq uleh in uu ku isticmaarsado xubnaha Xisbiga awoodiisa waxlaxiriira danahiisa khaaska ah.

**ART-9**

**GOLAHA ILAALINTA XISBIGA**

INTA AYKA KOOBANYIHIIN XUBNAHOODU, AWOOD DOODA, WAAJIBAAD KOODA, SIDA LAGUMAGACAABO, MUDDADA XILKA AY HAYNKARAAN

1) Waxay kakoobanyahiin sagaal (9) xubnood, waxaana soomagacaaba Golaha Sare, in ay ushaqeeyaan Xisbiga muddo koob iyo toban (11) sano ah, kadibna waxay xaq uleeyihiin mararbadan in Golaha Sare dib usoomagacaabaan.
2) Waxay awood u leeyihiin in ay casilaan markii loobaahdo xubnaha Golaha Sare.
3) Waxaa waajibku ah in ay ilaaliyaan danaha xisbiga, lasocdaan hormarka, dibdhaca iyo dhamaan mashruucyada Xisbiga markaste.
4) Waxay soomagacaabi Gudoomiyaha Xisbiga, waxayna asixin Gudoomiye Kuxigeenada markuu usoobandhigo Gudoomiyaha Xisbiga.
5) Waxaa waajibku ah in ay kulmaan sanadkii shan (5) jeer ama kabadan haddii loobaahdo.

**ART-10**

**GOLAHA TALABIXIYAASHA IYO QAAB DHISMOOD KOODA**

Waxay utaagan yahiin in ay oogudeeqaan Xisbiga taladooda markaste si uu Xisbigu uhormaro. Xubnaha Golaha Talabixiyaashu waxay kakoobanyihiin:

1. Duqeeda Magaalooyinka
2. Xubnaha baarlamaanka
3. Maamulayaasha Gobalada.

**ART-11**

**KORMEERAYAASHA HAY'ADDAHA**

WAAJIBAADKOODA IYO SIDA LAGUMAGACAABO

Kormeerayaasha Hay'addaha waxaa soomagacaabi Masuuliyiinta Gobalada waxaana asixin Gudoomiyaha. Waxay kashaqayn hormarinta adeega bulshada, siyaasadda Xisbiga, aroorinta dhaqaalaha, aroorinta macluumaadka caawiyaasha, iyo dhamaan mashruucyada Xisbiga. Waxay maamuli xubnaha Hay'addooda, waxeena lashaqayn Masuulka Gobalka ay joogaan.

**ART-12**

**HAY'ADDAHA**

Dhamaan xubnaha Hay'addaha Xisbiga waxaa xubno cusub kudarikara ama dhimikara Gudoomiyaha asagoo kaheesta ogolaansho Golaha Sare. Dhamaan Hay'addaha Xisbiga waxaa soomagacaabi, shaqadoodana qeexi Golaha Sare oo kaliyah.

**ART-13**

**SHARUUDAHA MUSHARAXIINTA**

1. Qoskastoo kamid ah xubnaha Xisbiga, oo raba in uu u ordo jagada maddexweenaha waa in uu lahaado taariikh todoba (7) sano ah oo uu bixinaayay khidmadda xubinimada Xisbiga.
2. Waa in uu sooqabtahay jagooyinka soosocda kahor in tuusan u tartamin jagada madexweenaha.
    a) Dud magaalo
    b) Xubin baarlamaan
    c) Masuul gobel
    d) Jagada Golaha Sare ee Xisbiga
3. Dhamaan taageerayaasha Xisbiga waxay u ordi karaan jagooyinka 'Dud magaalo, Xubin baarlamaan ama Masuul gobel' ayagoon lahayn taariikhda bixinta khidmadda xubinimada Xisbiga, waxeena xaq uleeyihiin in ay halaan taageerada Xisbiga oo buuxda.

**ART-14**
**NIDAAMKA MUSHARAXIINTU RAACAYAAN**

1) Musharax kaste waa in uu ogolaansho kahelo Hay'adda Mashruuca Siyaasadda kahor in tuusan kudhawaaqin musharexnimadiisa.
2) Musharex kaste oo ogolaansho kawaayay Hay'adda Mashruuca Siyaasadda, waxuu xaq uleeyahay mudo dhan (20) maalmood in uu ugudbiyo codsigiisa Golaha Sare.
3) Musharax kastoo kawaaya ogolaansho Golaha Sare, xaq oomaleh in uu tartamo ama dib racfaan uqaato.

**ART-15**
**NIDAAMKA CODAYNTA**

1) Qoskastoo kamid ah xubnaha Xisbiga waxaa la aqbali codkiisa markuu joogo oo kaliyeh.
2) Xubin kastoo kamid ah Xisbiga waxaa waajib ku ah in uu aqbalo, raaco, taageero meesha codku ubato markeste.
3) Dhamaan codaynta Xisbigu waxay ahaani mid kudhacda siqarsoodi ah.

**ART-16**
**SHARUUDA KULAMADA**

1) Dhamaan shir sanadeedka Xisbiga waxuu dhacayaa bisha labiyo tobnaad (December) koogeeda, ilaa in ay noqoto maalin sharciyan fasaxa ah mooyeene.
2) Hadduu shirku kusoo aado maalin fasax ah, waxaa shirka maalinkale uqaban Gudiga qabanqaabada shirka wax aan kabadnayn laba usbuuc, ayagoo wargalin dhamaan xubnaha Xisbiga.
3) Dhamaan xubnaha Xisbiga waxaa waajib ku ah in ay yimaadaan shirka, qofna lagama aqbalaayo in uu soodaaho waxdhan (5) daqiiqo, si uushirku udhaco waa in ay joogaan xubnaha Xisbiga boqolkiiba sagaashan iyo koow (91), haddii lawaayo tiradaas, waxaa shirka markale dib uqaban Gudiga qabanqaabada shirka wax aan kabadnayn sadex usbuuc, ayagoo wargalin dhamaan xubnaha Xisbiga.
4) Shirarkhaas ah waxaa xubnaha isugu yeerikara Gudoomiyaha markii loobaahdo, asagoo kaheeysta ogolaansho xubnaha Golaha Sare.
5) Shirkastoo ah mid sikhaas ah xubnaha Xisbiga la iskugu yeeray, waxaa waajib ah in lasiiyo xubnaha afar iyo labaatan (24) saacadood ogeesiis kahor shirka.

**ART-17**
**SHAQADA XISBIGA**

1) Shaqada kabanaan Xisbiga waxaa lagubixiyaa sida xubnaha Xisbigu usookala horeeyayn, iyo inta sano ee qofku bixinaayay khidmada xubinimada Xisiga.
2) Dhamaan xubnaha Golaha Sare iyo Masuuliyiinta Gobalada waa in ay nadiif kayihiin waxlaxiriira dambi, xadgudub bini aadman iyo waxiilamid ah.

3) Dhamaan xubnaha Xisbiga waa in ay u dhaqmaan si macquul ah, daacadnimo ah, danaha Xisbiguna kujirto.
4) Dhamaan xubnaha Xisbigu waxay laayihiin xuquuq islasiman, waa in ayna uhogaan samaan qaanuunka Xisbiga markaste.
5) Qofna looguma diidaayo shaqada Xisbiga kabanaan waxlaxiira qabyaaled, naafanimo, dumarnimo ama siyaasadiisii hore.

**ART-19**
**ILAHA DHAQAALA**

Dhaqaalaha Xisbigu waxuu kayimaadaa khidmadda ay bixiyaan xubnaha cusub marka ee isdiiwaangalin, khidmada xubinimada Xisbiga, iyo tabarucaadka kayimaada dadka ama ururada kale.

1) Xubinkastoo kamid ah Xisbiga waxaa waajib ku ah in uu bixiyo bilkaste $15.00 oo ah khidmada xubinnimada Xisbiga..
2) Xubinkastoo kamid ah Xisbiga oo raba in uu hormariyo khidmadda xubinimadiisa Xisbiga waa lasoodhawayn.
3) Xubinkastoon bixinin khidmadda xubinnimada Xisbiga sababla aan, waxaa loodiidi in uu codeeyo, mana u tartamikaro jagooyinka Xisbiga kabanaan.
4) Xubnaha haya xilalka Golaha Sare ama Gobalada waxay bixini $250.00 marka loodoorto jagada, kadibna waxay bixini bilkaste $30.00 oo ah khidmada xubinimada Xisbiga intuuhayo jagada.

**ART-20**
**MABNUUCIDDA ISTICMAALKA LACAGTA**

1) Majiro xubin kamid ah Xisbiga oo u isticmaalikarta dhaqaalaha Xisbiga danahiisa khaaska ah.
2) Xubinkastoo isticmaasha dhaqaalaha Xisbiga waxaa lagarabaa in uu keeno cadaynta waxuu u isticmaalay.
3) Xubinkastoo isticmaasha dhaqaalaha Xisbiga asagoon ogolaansho kaheesanin Hay'adda Mashruucyada dhaqaalaha waxaa lalatiigsan maxkamad.

**ART-21**
**MASUULIYADDA XUBNAHA**

1) Waxaa lagarabaa xubinkastoo kamid ah xisbiga in uu kashaqeeyo hormarinta mashruucyada Xisbiga.
2) Waxaa lagarabaa xubinkastoo kamid ah Xisbiga in uu unoqdo Xisbiga daacad, anshax wanaagsan kudhaqmo, masuuliyad diisana kasoobaxo.
3) Waxaa mabnuucka ah dhamaan xubnaha Xisbiga in xubini ka aargoosto xubinkale waxlaxiriira danahiisa khaaska ah.

## ART-22
## WAAJIBAADKA XUBNAHA

1) Waxaa lagarabaa dhamaan xubinkastoo kamid ah Xisbiga in uu kasoobaxo waajibaadka looxilsaaray waqtigii looqabtay.
2) Waxaa kamabnuuc ah xubinkastoo kamid ah Xisbiga in ay udhiibto waajibaadkii looxilsaaray xubinkale asagoon kaheesanin ogolaansho xubnaha Hay'addiisa.
3) Dhamaan xubnaha Xisbiga waxaa waajib ku ah in ay akhriyaan qaanuunka xisbiga kuna dhaqmaan.

## ART-23
## AXDIGA

1) Waxaa waxlagabadali karaa ama lagudarikaraa Axdiga Xisbiga markay ucodeeyaan boqolkiiba (75) xubnaha Golaha Sare iyo Golaha Talabixiyaasha.
2) Markastoo Axdiga waxlagabadali ama lugudari waa in ay asaxiyaan Golaha Ilaalinta Xisbiga.
3) Xubinkastoo kamid ah Xisbiga waxay xaq u leedahay in ay ugudbiso codsigeeda waxkabadalidda ama kudaridda Axdiga Golaha Sare.

## ART-24
## TAKOORID

1) Waxaa kamabnuuc ah Xisbiga in xubin kamid ah Xisbiga latakooro ama lagu yaso waxlaxiriira qabyaalad, dumarnimo, naafanimo, ama siyaasad hore.
2) Dhamaan xubnaha Xisbiga waxaa kamabnuuc ah in uu iskudayo ama weediiyo xubinkale oo kamid ah Xisbiga qabiilkiisa.
3) Waamabnuuc in qof loogudiido xubinnimadiisa waxlaxiriira qabyaalad, dumarnimo, naafanimo, ama siyaasad hore.

## ART-25
## XAQUUQDA XUBNAHA

1) Dhamaan xubnaha Xisbiga waxay xaq u leeyihiin markee jabiyaan qaanuunka Xisbiga in hadal loogudigo, kadibna lasiiyo qoraal digniin ah, kahor intaan lacasilin.
2) Dhamaan xubnaha Xisbiga ee lagu eedeeyo in ay kuxadgudbayn qaanuunka Xisbiga, waxay xaq u leehiyiin in lasiiyo fursan ee iskudifaacaan, codsigoodana ugudbiyaan xafiiska Masuulka Gobelka ay joogaan, haddii loobaahdana Golaha Sare goobjoog ahaadaan meesha laguxukmin.
3) Dhamaan xubnaha Xisbigu waxay xaq u leeyihiin in ay iskacasilaan xubin noqoshada Xisbiga markee go aan sadaan.
4) Dhamaan xubnaha Xisbigu waxay xaq u leeyihiin in ay kaqeebqaataan siyaasadda Xisbiga, una tartamaad fursadaha kabanaan Xisbiga markee rabaan.

## ART-26
## XALINTA KHILAAFKA

1) Hadduu dhaxmaro khilaaf xubin kamid ah xubnaha Xisbiga iyo xubin kamid ah Masuuliyiinta Gobalada waxaa baaritaan kusamayni Golaha Sare, kadibna kasoosaari go'aanka oogu haboon.
2) Hadduu dhaxmaro khilaaf xubin kamid ah xubnaha Xisbiga iyo xubin kamid ah Golaha Sare, inta kahadhay xubnaha Golaha Sare ayaa umagacaabi Gudi kumeelgaar ah oo leh awood buuxda, in ay baaraan waxiikeenay khilaafka, kadibna kagaaraan go'aanka oogu haboon.
3) Xubinkastoo kamid ah Xisbiga waxuu xaq u leeyahay in uu ugudbiyo codsigiisa Golaha Sare markuu dhaco khilaaf, Golaha Sarena waxaa waajib ku ah in ay xaliyaan khilaafkaas mudo toban (10) maalmood ah gudahood.

## ART-27
## LASOCODKA DHAQDHAQAAQA XISBIGA

Golaha sare ayaa masuul ka ah in ay lasocdaan dhamaan geedisocodka siyaasadda Xisbiga iyo in ay baaritaan kusameeyaan arimo khaas ah markii loobaahdo ama Golaha Ilaalinta Xisbiga kacosodaan.

## ART-28
## NIDAAMKA ISTIQAALADA

1) Xubinkastoo kamid ah Xisbiga oo rabta in uu iskacasilo xubinimadii Xisbiga waxuu ugudbini warqaddiisa istiqaalada xafiiska Masuulka Gobalka uu joogo.
2) Xubinkastoo iscasishay, kadibna go'aansata in ay sooceshato xubinimadiisii, waxuu ugudbini codsigiisa xafiiska Masuulka Gobalka uu joogo, kadibna waxuu bixini dhamaan khidmaddii xubinimada ee uusanbixinin intuukamaqnaa Xisbiga.

## ART-29
## DIB U CODSIGA XUBIN NOQOSHADA XISBIGA

1) Xubinkastoo lagacasilay Xisbiga oo rabta in ay did u codsato kamidnoqoto Xisbiga waxay u gudbini codsigeeda Masuulka Gobalka ay joogo.
2) Kadibna waxaysugi inta uu kasiin ogolaansho; kadibna waxay kudhaaran in ay u hogaansami Qaanuunka Xisbiga markaste; kadibna waxaybixini dhamaan khidmaddii xubinimada ee aysan bixinin inteekamaqneed Xisbiga.
3) Hadduu diido codsigii Masuulka Gobelka ayjoogo, waxay xaq u leedahay in ay ugudbiso codsikale Golaha Sare ee Xisbiga; kadibna aysugto inta ay kasiini ogolaansho; haddeediidaan codsigeedii xaq oomaleh in ay kamidnoqdo Xisbiga mudo afar (4) sano ah oo dambe.

## ART-30
## AWOODDA

1) Dhamaan geedisocadka siyaasadda, mashruucyada, iyo shirarka Xisbiga waxaa hogaamini oo masuulka ah Golaha Sare ee Xisbiga markaste iyo meewalba oo lajoogo.
2) Golaha Sare ee Xisbiga ayaa awood u leh in ay xaliyaan khilaaf kastoo kadhaca Xisbiga dhaxdiisa
3) Golaha Sare ayaa asixinkara,diidikara hay'addaha Xisbiga; awoodna u leh in ay usheegaan xubnaha Xisbiga in ay raacaan Qaanuunka Xisbiga.

## ART-31
## DHAARTA

Xubnaha Golaha Sare iyo Masuuliyiinta Gobalada waxaa waajib ku ah in ay kudhaartaan magaca Alle iyo kitaabka Quraanka Kariimka ah in ay daacad unoqoni Xisbiga markaste, iyo marxalo kastoo lojoogo.

## ART-32
## KUXADGUDUBKA QAANUUNKA XISBIGA

1) Xubinkastoo kuxadgudubta Qaanoonka Xisbiga waxaa lasiini digniin hadal ah; marka labaad waxaa lasiini qoraal digniin ah; marka sadaxaad waxaa lasiini warqadda casilaadda.
2) Xubinkastoo u isticmaasha dhaqaalaha Xisbiga waxkusaabsan danahiisa khaaska ah waalacasili islamarkaaba; kadibna waxaa lalatiigsan sharciga.
3) Dhamaan dhaqaalaha Xisbiga waxaa luu isticmaalikaraa oo kaliyeh waxii kusaabsan Xisbiga danahiisa.
4) Xubinkastoo kamid ah Golaha Sare ama Masuuliyiinta Gobalada oon dhameestirin waajibaadkiisii waqtigii loogutalagalay sababla aan, waxaa lasiini hadel digniin ah; marka labaad waxaa lasiini qoraal digniin ah; marka sadaxaad waxaa lasiini warqaddii casilaadda.
5) Xubinkastoo kamid ah Xisbiga oo kaqeebqaadata shir laguqabtay magac qabiil, waxaa lasiini qoraal digniin ah; marka labaadna waxaa lasiin warqaddii casilaada.
6) Xubinkastoo kamid ah Xisbiga oo cayda si ulakac ah, shaqsi ama koox waxaa lasiini qoraal digniin ah; marka labaad waxaa lasiini labo (2) usbuuc oo shaqo fadhiisin ah; marka sadaxaad waxaa lasiini warqaddii casilaadda.